

لا إله إلا الله



القيادة العسكرية

ARMED FORCES COMMAND
TALISKA CIIDANKA

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ
لِلنَّشْرِ الْعَاجِلِ

FOR IMMEDIATE RELEASE



حركة الشباب المجاهدين

HARAKAT AL-SHABAAB AL MUJAHIDEEN
XARAKADA MUJAAHIDIINTA AL-SHABAAB

“Camaliyad cadawga lagu beegsaday saldhiga Turkiga ee Muqdisho”

19 Jamadul Awal 1445 H (03 Desember 2023)

Ciidamada Mujaahidiintu waxay maanta oo Axad ah, saacaddu markii ay ahayd 08:20 subaxnimo, camaliyad ishtish-haadi ah la beegsadeen maleeshiyaat murtadiin ah oo ku sugnaa afaafka hore ee saldhiga ciidamada Turkigu ka samaysteen degmada Wadajir ee Magaalada Muqdisho. Maleeshiyadaan oo tiro ahaan ka badnaa 100 xubnood ayaa goobta u joogay si loogu diiwaan geliyo ku biirista ciidamada calooshood u shaqaystayaasha ridada ah ee ay tababarkooda, qalabayntooda iyo maamulkoodaba leedahay dawladda Turkiga oo kamid ah isbahaysiga saliibiyiinta NATO ee kusoo duulay dalka Muslimka ah ee Soomaaliya.

Allaah fadligiis, camaliyadda ayaa u dhacday sidii loo qorsheeyay waxaana jira khasaare dhimasho iyo dhaawac ah oo cadawga halkaas ku soo gaaray. Tirada hordhaca ah ee dhimashada murtadiinta waxay gaarayaa 32 murtad, halka dhaawucu intaas ka badanyahay. Mujaahidiintu waxay mar kale u digayaan cid walba oo doonaysa inay ku biirto cadawga ashahaado la dirirka ah ee la dagaalamaya shareecada Islaamka, waxayna qof walba oo arinkaas ku fikiraya xusuusinayaan in aysan ku kadsoomin ballan-qaadayada dhalanteedka ah ee ay cadawgu samaynayaan, taas badalkeedana ku waana qaataan dharbaaxooyinkii ku dhacay murtadiintii iyaga kaga horeeyay dhabahaan mugdiga ah ee ridada, kuwaas oo u qaybsamay kuwo saldhigyadooda lagu dhex laayay, kuwo maydalkooda furimaha looga soo cararay, qaar dhaawacyo xun weli la jiifa iyo kuwo welwel iyo cabsi joogta ah la nool.

Xarakada Mujaahidiinta Al-Shabaab waxay u dagaallameysa dhawritaanka badqabka Ummadda Muslimka ah, hirgelinta Shareecada Islaamka iyo inay dhammaan dhulalka Muslimiinta ka xoreyso gaalada iyo murtadiinta dabadhilifka u ah. Xarakada Mujaahidiinta Al-Shabaab waxay mar kale ku celinaysaa dalabkii ahaa in dadka Muslimiinta ah ay ka fogaadaan saldhigyada, xarumaha iyo xafiisyada cadawgu ku leeyihiin degmooyinka iyo deegaanada ay xoogga uga haystaan ummada Soomaaliyeed ee Muslimka ah.

Waxay Xarakada Mujaahidiinta Al-Shabaab ballan ku qaadeysaa inay sii wadi doonto Jihaadka ka dhanka ah isbahaysiga caalamiga ah ee saliibiyiinta iyo dabadhilifyadooda murtadiinta ah illaa ay geyiga Soomaaliyeed ka saareyso cadowga hororka ah ee ku soo duuley, iyo illaa diinta dhammaanteed ay Allaah keliya u sugnaaneyso. Allaah, subxaanahu watacaalaa, wuxuu yiri:

وَقَاتِلُوهُمْ حَتَّى لَا تَكُونَ فِتْنَةً وَيَكُونَ الدِّينُ لِلَّهِ فَإِنْ انْتَهَوْا فَلَا عُدْوَانَ إِلَّا عَلَى الظَّالِمِينَ [البقرة: 193]



﴿وَاللَّهُ الْعِزَّةُ وَالرَّسُولُ وَالْمُؤْمِنِينَ وَلَكِنَّ الْمُنَافِقِينَ لَا يَعْلَمُونَ﴾

"But honour belongs to Allah and His Messenger, and to the Believers; but the Hypocrites know not"